2020-21 Xaduuda Dugsitada Dhexe FAQ | *Somali Translation*

Waa maxay sababta aagagga imaatinka xilligan loo beddelayo sannad dugsiyeedka 2020-21?

Sagaalkii sano ee lasoo dhaafay waxaa kordhay ama kobcay qaabab kala duwan taas oo ku saabsan isdiiwaan galinta ardayda loogu kala qoondayn lahaa degmada gudaheeda ee Dugsiyada dhexe waxay horseedeen kala duwanaansho sii kordheysa tirada ardayda ee dugsi walba oo dhexe. Tirada ardayga ee udhaxeysa Bariga iyo Galbeedka ayaa hada ah 427 arday waxaana la saadaalinayaa in kabadan 400 mustaqbalka hadii aagaga imaatinka ay sidan sii ahaadaan. Dugsiga Dhexe ee Galbeedka ayaa in kabadan 100 arday ka awood badan. Dugsiga Dhexe ee Bariga wuxuu gaarayaa 300 oo arday taas ka hooseeya intii loogu talagaley. Farqiga u dhexeeya cabirka iskuul walba wuxuu soo bandhigayaa caqabado sida ay iskuuladeenu u shaqeeyaan, waxaa kamid ah: cadaadis meelaha la isla wadaago ah, caqabadaha kujira qaab dhismeedka macalimiinta, iyo aasaasida shaqaalaha.

Waxaan isticmaaleyney qaabkii hore ee sanad dugsiyeedkii 2011-12. Saddexda dugsi hoose ee ay dhigtaan ardayda ugu badan (Eagle Creek, Jackson & Sweeney) ugu horrayn waxaa laga diiwaangali jirey Galbeedka Dhexe(west Middle School). Labada dugsi hoose ee (Red Oak & Sun Path) waxaas laga diiwaan galin jirey Dugsiga Dhexe ee Bariga.(East Middle School).

Tixraac ahaan, Iskoolda hoose ee (Red Oak iyo Sun Path) waxay ahaayeen labada dugsi hoose ee ugu ardeyda badneyd markii la daabacay qorshaynta xaadirinta.

Ardayda dhigata isla dugsi hoose ma sidoo kale dhigan doonaan isla dugsiga dhexe?

Maya. Ardayda waxaa loo qoondeeyay dugsi dhexe oo ku saleysan cinwaankooda; kuma salaysna iskoolkii hoose ee uu dhiganayey.

Dugsigee dhexe ayaa furaya diiwaangelintiisa ardaydu dhigandoonaan?

Dhaqanka hadda jira oo ah in haddii ardewy badan dhigtaan hal iskuul waa lasii wadi doonaa.

Sideen ku ogaanayaa inaan Iskuulka u logeeyn doono iyo in aan bas u raaci doono, sannad dugsiyeedka 2020-21?

Ardayda dugsiga dhexe ee fasalada 6-8 ee ku nool hal mayl ama in ka badan dugsiga loo qoondeeyay waxay xaq u leeyihiin gaadiid.

Sidee macluumaadka loogu wargalin doonaa ardayda, waalidiinta iyo bulshada?

Oktoobar 14, 2019, Guddiga Dugsiyada Shakopee waxay u codeeyeen oo go,aan ku gaareen labo arimood oo quseys, labadaas arimood oo lala wadaagayaa dadweynaha si ay uhelaan ra'yi iyo jawaab celin kahor inta gudigu go'aan kama dambays ah gaadhin bisha Diseembar ama Janaayo. Degmadu waxay u adeegsan doontaa dhamaan qalabyada isgaarsiinta si ay u siiso jaaliyadeena iskuulada fursad ay ku siiyaan jawaab celin ku saabsan labadaa arimood.. Macluumaadka waxaa lagu qorey websaydhkeena waana la cusboonaysiin doonaa markii aan go,aan ka gaarno arintaan.Macluumaadka waxaad ku arki doontaan waqtiga uu jiro kulanka macalimiinta iyo waalidka skuulada hoose iyo kan dhexe. Waxa kale oo jira laba kulan oo ra'yi ururin loo qorsheeyey dadweynaha:

- Dugsiga Dhexe ee Bariga (EMS): Oktoobar 29, 2019 6 pm-7pm, Xarunta Warbaahinta EMS
- Dugsiga Dhexe ee Galbeedka (WMS): Noofambar 7, 2019 6 pm-7pm, Xarunta Warbaahinta WMS

Sidee loo qoondeyn doonaa maclimiinta wax barta Dugsiyada dhexe?

Aagagga imaatinka cusubi waxay sababi doonaan isbedelo ku imaanaya macalimiinta.. Qaar ka mid ah shaqaalaha West Middle School waxay u guuri doonaan East Middle School. Sida had iyo jeer, shaqaalaha ayaa loo habeeyay si ay uga tarjunto tirada ardayda ee dugsi walba. Shaqaalaha waxaa lagu ogeysiin doonaa meelaynta dejinta markay tahay nasashada guga Maarso 2020.

Waa maxay shuruudaha / cabiraadaha aaggaga iskuulada dhexe?

Xaaladaha iyo talooyinka waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo la adeegsanayo aasaaska / cabbirrada soosocda (oo aan lagu xusin amar gaar ah):

- Masaafada socodka
- Si lataaban karo suurta galna ah
- Tirakoobka dadka la midka ah: Qado bilaash ah / Qiimo dhimis, Barteyaasha Af Ingiriisiga, Waxbarashada Gaarka ah
- Ku filnaasha Gaadiid ka
- Dhismahu iskuulaka inta uu qaado
- Aqoonsiga koritaanka / horumarka la soo jeediyey
- Tixgelimo kale
- 3-5 sano ee la soo dhaafay (ka wanaagsan 5-7 sano

Fadlan la wadaag macluumaad dheeri ah oo ku saabsan jadwalka aagagga ay ka soo xaadiraan dugsiga dhexe.

Bishii Maarso, maamulka degmadu waxay soo bandhigeen macluumaad ku saabsan isbeddelada isqorista, dhismaha inta ardeydu uu qaado, isqorista ardayda hada jirta , iyo horumarka degmada dhexdeeda gudiga iskuulka.

Horraantii Luulyo, guddiga dugsiyada ayaa dib u eegay macluumaadka ku saabsan is diiwaangelinta dugsi walba ee hadda jira iyagoo saadaalinaya shanta sano ee soo socota ee xiliga xagaaga ama waqtiga iskuulku xiran yahay. Guddigu wuxuu faray maamulka degmada inay eegaan aagagga ay ka soo xaadiraan ardeyda imaaneysa dugsiyada dhexe. Sidoo kale bishii Luulyo, macluumaad la mid ah ayaa lala wadaagay Kooxda Hawlaha Bulshada ee degmada.

Bishii Agoosto, guddiga dugsiyada ayaa ka wada hadlay jadwalka, shuruudaha iyo habka kulamada dadweynaha iyo fikradaha kulanka guddiga. Maamulka degmadu waxay u soo abndhigeen arimooyin ku saabsaniska xaadirinta/ tusaale iyo waqti go,an. Wakaaladda Iskuulka Shakopee markay ahayd Sebtember 23.

Markey aheed Oktoobar 14, Gudiga iskuulka Shakopee waxay u codeeyeen inay labo xaaladood oo ah aagaga dugsiyeed. Halkan guji si aad u aragto xaaladahaas https://www.shakopee.k12.mn.us/Page/9958. Muuqaallada waxaa lala wadaagayaa bulshada dugsiyada si ay uhelaan ra'yi iyo jawaab celin kahor inta gudigu go'aan kama dambays ah gaadhin bisha Diseembar ama Janaayo. Intaa waxaa sii dheer, macluumaadka dadweynaha iyo kala-fadhiyada fikradaha ayaa lagu qabanayaa dugsi kasta. Macluumaadka sidoo kale waxaa lagu bixin doonaa shirarka waalidiinta iyo macallinka, waxaa lagu dhejin doonaa websaydhkeena iyo warbaahinta bulshada, waxaana lagu soo dhexradi doonaa faylalka ay ardeydu guriga u qaataan ee gaduudan.

Ma ogolaan doontaa wareejinta degmo-degsiyeed?

Mid ka mid ah 00 ay dagmadu casriyeynta aagagga isdiiwaangelinta dugsiga dhexe waa in la gaaro isku-dheelitirinta isqorista ee u dhexeeya Dugsiyada Dhexe ee Bariga iyo kan koofureed. Iyada oo lagu taageerayo himilada, degmadu waxay cusboonaysiineysaa qawaaniinta codsiyada bedelka degmada ee ardayda dugsiga dhexe.

Soo wareejinta degmo-dugsiyeedka waxaa loo oggolaan doonaa illaa 100 farqi u dhexeeyaisdiiwaangalinta ardayda u dhaxaysa labada iskuulada dhexe (ku dhawaad 5% wadarta isqorista dugsiga dhexe ee Shakopee Public Schools).

Codsiyada wareejinta degmo-dugsiyeedka waa la ururin doonaa waana la aqbali doonaa ilaa Janaayo 31 kahor sannad dugsiyeedka soo socda. Wixii ka dambeeya Janaayo 31, dhammaan dalabyada waxay heli doonaan tixgelin. Haddii tirada codsiyada wareejinta degmadu ay sii ahaato farqiga u dhexeeya diiwaangelinta labada dugsi dhexe ee wax ka yar 100 arday, dhammaan wareejinta waa la oggolaan doonaa. Haddii codsiyada wareejinta degmadu ay ka weynaato 100 farqiga u dhexeeya ardayda ee isqorista labada dugsi, bakhtiyaa-nasiibka ayaa loo adeegsan doonaa go'aaminta codsiyada bedelka ee la oggolaaday.

Mar alla markii arday laga diiwaangaliyo dugsi iyada oo loo sii marayo wareejinta degmo-dugsiyeed, diiwaangelinta ardayga ayaa sii dhigan doona dugsiga cusub iyadoon loo baahnayn codsi dheeraad ah, ama waraaqaha dib u cusboonaysiinta sannadlaha ah. Ardayda helaya codsashada wareejinta degmo-dugsiyeedka la oggolaaday waxay mas'uul ka noqon doonaan gaadiidkii ay iskuulka ku imaan lahaayeen kuna noqon lahaayeen

Hal Sannad oo Kaliya: 2020-21 Sannad Dugsiyeed Iyada oo la raacayo duruufaha gaarka ah ee la socda isbeddelka aagagga ka-qaybgalka, Iskuullada Dadweynaha ee Shakopee waxay adeegsan doonaan xeerar wax laga beddelay ee codsiyada wareejinta degmada ee hal sano oo keliya, sanad-dugsiyeedka 2020 -21. Wax ka beddellada soo socda ayaa lagu samayn doonaa qawaaniinta codsiyada bedelka deg-degga ee sanad dugsiyeedka 2020 -21 oo kaliya:

- Codsiyada ay sameeyeen ardayda ka diiwaangashan fasalka 8aad ee sanad dugsiyeedka 2020-21 (ardayda dhigata fasalka 7aad hadda) waxay heli doonaan mudnaan haddii ay doonayaan inay sii wataan dugsiga dhexe ee ay horay u soo xaadireen.
- Beddelka degmo-dugsiyeedka waxaa loo oggolaan doonaa ugu badnaan 150 kala duwanaansho ardayda xagga isqorista labada dugsi dhexe (ugu dhawaan 7.5% wadarta isqorista heerka dhexe ee Shakopee Public Schools).
- Gaadiidka iskuxiran ee udhaxeeya labada dugsi dhexe ayaa la heli doonaa kahor iyo kadib iskuulka, gaadiid qaadida ardayda heshay degel degmo, sanad dugsiyeedka 2020-21 kaliya.